



## KNOW YOUR RIGHTS

### *As a Student*

KOOBAN

- Shuruucda goboladu waa kala duwan yihiin laakiin guud ahaan waxay amrayaan dugsiga inuu kaa ilaaliyo caga-juglaynta iyo takoorka.
- Xaqbaad u leedahay inaad soo sheegto, waa inaad weliba soo sheegto, cawaandada iyo caga-juglaynta ka dhacda dugsiga.
- Ardaydu xaq ayay u leeyihii inay siday doonaan u hadlaan una labbistaan. Hadii laguu sheego inaad u hogaansanto sharci dugsiga ah oo kuula muuqda takoor la soo xidhiidh CAIR.
- U soo sheeg CAIR cawaandadda iyo caga-juglaynta ka dhex dhacda dugsiga.



# KNOW YOUR RIGHTS

*As a Student*

MACLUUMAADKANI MAAHA IN LOO TIXGELIYO TALO SHARCI.



[WWW.CAIR.COM](http://WWW.CAIR.COM)



*Council on American-Islamic Relations*

## HAB LABBIS

- + Waa inaad xidhataa xijaabkaaga ama koofiyadaada, ama isu dabool sidii kale ee kula saxnaata, xataa hadii dugsigu leeyahay hab labbis ama dirays la isaga baahan yahay.
- + Hadii aanad doonayn inaad ka qayb qaadato waxqabad dhinaca iskuulka ah kaas oo u baahan inaad xijaabka iska bixiso ama umuujiiso jidhkaaga qaab diintada wax u dhimaysa, sida dabbaasha, waa in iskuulkaagu ku siyya beddelka waxqabadkaas
- + Hadii aanad doonayn inaad ka qayb qaadato waxqabad kaasoo keenaya inaad xidhiidh dhow la samayso ama taabato qof jinsigaaga ka duwan, waxa aad codsan kartaa beddelkiis ( Waxqabad kale).
- + Waxa aad xaq u leedahay inaad xidhato dhar ciyaareed dabboolan oo asturan marka aad ka qayb qaadanayso dhacdooyinka ciyaaraha. ( Tusaale, Dugsigaagu kuuma diidi karo inaad ka qayb qaadatid tartanka dabbaasha isagoo sababaysanaya go'aankaaga diimeed ee aad ku xidhanayso dharka asturan ee dabbaasha.)

## FASAXYADA IYO SALAADAH

- + Dugsiyadu kuma ciqaabin karaan ardayda ka maqnaanshaha dugsiga ee maalamo fasaxeedyada diinta. Waa inaad hore ka sii codsataa maalinta fasaxa ee Ciidda.
- + Waxa aad u tukan kartaan keli ama koox ahaan inta lagu guda jiro wakhtiga iskuulka. CAIR (Golaha Xidhiidh Islaamka ee Maraykanka) Waxa ay kugula talinaysaa inaad tukato xillii aan ku beegnayn hawlaho iskuulka ama waqtiga xiisadaha.
- + Dugsiga waajib kuma aha inuu ku siyo qol tukasho oo cayiman, balse ardaydu waa inay heli karaan meel ku habboon tukasho/salaadda.
- + Waxa suuro gal ah in laguu ogolaado inaad iskuulka ka baxdo Salaadda Jimcaha daraadeed, laakiin taasi markasta laguma damaanad qadi karo. Waa inaad la xidhiidhaa saraakiisha maamul ee dugsiga haddii aad tan rabto.

## CAWAANDADA IYO CAGA-JUGLAYNTA

Sharchiyada goboladu waa kala duwan yihii balse guud ahaan waxay u baahan yihii in dugsiyadu:

- + Kaa ilaaliyaan caga-juglaynta iyo takooridda,
- + Mamnuucaan cawaandadda ku dhisan diinta, midabka iyo dhalashada iskuuladuna waa inay shuruucdooda cawaandadda dadwaynaha u soo badhigaan.
- + Lahaado hab-raac baadhitaan oo ku saabsan cawaandadda. Hadii aad u sheegto macallin ama qof wayn oo kale oo iskuulka jooga in lagugu cawaandoonayo, waa inay sameeyaan wax ay kugu caawinayaan.
- + Hubiyaan inaa lagugu ciqaabin soo sheegidda cawaanadada amase caga-juglaynta amaseeba codsashada ku camal-falka diintaada.



## WAA MAXAY CAWAANADADDA?

- + Cawaandaddu waxay u dhici kartaa iyadoo qof ahaan ah, qoraal ah, farriin ah, am hab online ah oo la soo dhex marinayo ciwaan amase baraha bulshada.
- + Cawaandaddu waxa ay u dhaxaysaa takoorid ilaa aflagaado afka ah ilaa iyo gacan ka hadal, badanaana waxa ay socotaa muddo dheer.
- + Cawaandaddu waxa ay yeelan kartaa qaabab badan, kuwa ugu caansan ee ardayda Muslimiintu la kulmaan wax ka mid ah in lagaa dhufto masarka amase koofiyadda, lagugu cadaadiyo inaad diin kale gasho, in fasalka dhexdiisa lagu sameeyo Faallooyin cay ah oo ku saabsan Islaamka , iyo gacan ka hadal.